

Fariinta 1AAD | Waa maxay Dastuur?



Dastuurku waa heshiis bulsho, waana sharciga ugu sareeya ee dalkeena marka laga reebo shareecada Islaamka oo uu waafaqsan yahay, sida uu qabo qodobka 4AAD ee dastuurka KMG ah ee Somaaliya farqadiisa koobaad oo u dhigan

“Shareecada ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga dalka ugu sarreeya, isaga ayayna xukuumaddu u hoggaansamaysaa, wuxuuna hagayaa hal-abuurka iyo go’aannada siyaasadeed ee qaybaha Dawladda oo dhan”.

Dhamaan Hay’adaha Dawladda sida Fulinta, Xeerdejinta iyo Garsoorkuba waxay u hogaansan yihiin dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka oo waafaqsan ama ka farcamay dastuurka.